

Doorashada 2019

**Codkaaga,
doorashadaada!**

www.fredrikstad.kommune.no/valg2019



VALG



FREDRIKSTAD
KOMMUNE

**DEN
lille
VERDENS-
BYEN**

Dooro doorashada! Ucodee maamulka degmeda 2019!

Dadka ajaanibka ah ee Norway degen ayaa ka qaybgalkooda doorashooyinku hoosaysaa. Taasoo ay sabab u noqon karto in ajaanib badan oo xaq uleh inay codeeyaan aanay ogayn in ay doorshada codayn karaan. Hadaba waxaad uga qaybqaadan kartaa qaabkii arintaa waxlooga qaban lahaa adigoo doorashada xili dayreedka ku beegan codeeya!

Warqadani waxay kuusoo gudbinaysaa macluumaad ku saabsan sababta ay muhiimka u tahay in aad codaysid, cida codaynkarta iyo qaabka aad u codayn kartid.

Maxay tahay sababta aad ucodaynaysid?

Inaad codaysaa waa fursadaada iyo xuquuqdaada dimuqraadiyadeed ee aad saamayn ugu yeelan kartid maamulka degmadeena. Hadii aad rabtid inaad saamayn ku yeelatid mustaqbalka Fredrikstad waa inaad codaysaa! Dimuqraadiyadu waxay dhigaysaa in dalka iyo degmooyinkaba ay maamulaan xildhibaano lasoo doortay. Xisbiga siyaasadeed iyo xubnaha aad dooranayso adigaa u doorleh. muhiimadu waa in aad ka qayb qaadatid!

Norway waxaa 2019 ka dhacaya doorashooyinka degmooyinka iyo kuwa goboladaba. Waxaad taageeraysaa demuqraadiyada Norway hadii aad ka qaybqaadatid doorashada.

Sidee u codaynkartaa doorashooyinka gobolka iyo degmeda ee sanadkan?

Maalmaha la codaynayaa waa Axad 8. iyo Isniin 9. Sebtember. Hadii aad rabtid inaad wakhtigaa kahor sii codaysid waxaad codaynkartaa laga bilaabo 12. Ogosto, waxaadna ka codaynkartaa Magaalada hoolkeeda ama shaneemada Fredrikstad. Waxaad sidoo kale ka codaynkartaa goobeheena doorashooyinka ama maktabadaha iyo moolasha.

Waxaad helidoontaa kaadhka codaynta oo ama boostada laguugu soo dirayo ama qaab kambiyuter ahaana aad ku heli doontid, hadaad sii qaadatid kaadhka doorshada warqad ahaan ama aad taleefanka ku haysatid kolkaad codaynaysid, waxaa kuu fududaanaysa codaynta, balse muhiim ma aha. Waxa lagaa rabaa waa inaad wadatid aqoonsi sawir leh (baasaboora, laysan/liisan ama kaadhka bangiga).

Goobaha doorashada waxaad ka heli doontaa warqada codeynta ee xisbi kasta oo xubno usoo diyaariyey doorashada gobolka iyo tan degmada. Waxaad doorashada degmada ku codaynaysaa warqada midabka basaliga ah, doorashada gobolkana waxaad ku codaynaysaa warqada midabka buluuga ah.

Waxaad aad ugu kalsoonaataa in codayntaadu qarsoodi tahay – shaqaalaha doorashooyinka iyo cidkale toona xaq uma laha inay ku waydiiso cidaad u codaysay.

Yaa codayn kara?

- Qofkastoo haysta jinsiyada Norwejiya buuxiyeyna 18 sano intaanu sanadka 2019 dhamaan, degena ama ku diiwaan gashan inuu degen yahay Norway.
- Dadka haysta jinsiyadaha wadamada waqooyiga Yurub (Denmark, Island, Finland iyo Sweden) sidoo kale buuxinaya 18 sano intaanu dhamaan sanadka 2019, loona diiwaan geliyey inay degen yihiin Norway ugu danbayn 30. Juun sanadkan.
- Dadka haysta jinsiyadaha ajaanibka ah ee buuxinaya 18 sano inaatnu dhamaan sanadka 2019, kuna diiwaan gashanaa inay degenaayeen Norway 3 sano ee ugu danbaysay si xidhiidhsan kahor maalinta doorashada.

Xagee ku codayn kartaa?

Waxaad codayn kartaa maalinta doorashada ama waad sii hormarsan kartaa codayntaada.

Hadii aad codayntaada sii hormarsanaysid waxaad codaynkartaa inta u dhaxaysa 12 Ogosto ilaa 6. Sebtember, codkaagana waxaad ku dhiiban kartaa goobaha kala ah, Magaalada hoolkeeda/shaneemada Fredrikstad ama meelo kaloo degmeda ah.

Maalinta doorashada Axada 8. iyo Isniinta 9. Sebtember, waxaad codaynkartaa inta u dhaxaysa saacadaha 12.00 duhurnimo ilaa 09:00 (21:00) fiidnimo. Kaadhkaaga codbixinta waxaa ku qoran waaxdaada codayneed, balse waad ka codayn dhamaan 18 waaxood ee codbixinta.

Halkan ka dheeho goobaha codbixinta iyo goobaha codbixinta hordhaca ah: www.fredrikstad.kommune.no/valg2019

Halkan waxaad kaloo ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan doorashada. Hadaad wax su'aal ah oo ku saabsan doorashada qabtid, waxaad wici kartaa xarunta khidmaynta oo leh tlf. 69 30 60 00 ama ugu dir E-mail torget@fredrikstad.kommune.no.

Codayntaada – doorashadaada!

Halkan ayaad kasii codaynkartaa iyadoon la gaadhin xiligii codaynta doorasho deegaanka 2019

Byhallen/Fredrikstad kino

12.08 – 16.08: Man. – Fre. kl. 9 – 18
19.08 – 23.08: Man. – Fre. kl. 9 – 18
24.08: Lør. kl. 12 – 15
25.08: Søn. kl. 15 – 20
26.08 - 30.08: Man. – Fre. kl. 9 – 18
31.08: Lør. kl. 12 – 15
01.09: Søn. kl. 15 – 20
02.09 - 06.09: Man. – Fre. kl. 9 – 20

Stemmebrakka

15.08 - 16.08: Slevik skole kl. 16 - 20
19.08 - 25.08: Stortorvet kl. 12 – 20
26.08 - 28.08: Ambjørnrød skole kl. 16 – 20.
29.08 - 31.08: Østsiden storsenter Sellebakk kl. 12 – 20
02.09 - 03.09: Coop Extra Gressvik kl. 12 – 20
04.09 - 06.09: Kiwi Lisleby kl. 12 – 20

Kjøpesentre

Østfoldhallen

24.08: Lør. kl. 10 – 18
26.08 – 30.08: Man. – Fre. kl. 10 – 20

Torvbyen

31.08: Lør. kl. 10 – 18
02.09 – 06.09: Man. – Fre. kl. 10 – 20

Bibliotek

Hovedbiblioteket

26.08 - 31.08: Man. – Fre. kl. 11 – 16
31.08: Lør. kl. 10 – 15
02.09 - 05.09: Man. – Tor. kl. 11 – 19
06.09: Fre. Kl. 11 – 16

Østsiden bibliotek

02.09 – 06.09: Man. – Fre. kl. 10 – 14

Skoler

Høgskolen i Østfold, campus Fredrikstad

22.08 – 23.08: Tor. – Fre. kl. 10 – 14

Glemmen videregående skole

26.08 – 27.08: Man. – Tir. kl. 10 – 14

Frederik II videregående skole

28.08 – 29.08: Ons. – Tor. kl. 10 – 14

www.fredrikstad.kommune.no/valg2019